[redacted]


# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad | Muqdisho, 1 Luulyo 1976 | L. 7

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOOBNIIN

### XAASHIDA SADDEXAAD EE KACAANKA

### BOGGA KOWAAD

### SHARCI


SHARCI Lamb. 17 ee 1 Luulyo 1976: — *Dhisidda Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed* . . . . Bogga 5

SHARCI Lamb. 18 ee 1 Luulyo 1976: — *Habka Hoggaaminta Dalka* . . . . . . . . . . . . . . . . » 7

SHARCI Lamb. 19 ee 1 Luulyo 1976: — *Ku wareejinta Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaauliyeed* . » 9


### BOGGA LABAAD

### XEER

W. M.

### BOGGA SEDDAXAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.


Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

XAASHIDA SADDEXAAD EE KACAANKA

# GUDDOONSHAHA

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Sharcigii 1aad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Horukaca ay Ummadda Soomaaliyeed gaartay dhinaca Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Bulshada ka dib intii uu jiray Kacaanka Oktoobar;

ISAGOO TIXGELIYEY: Guulaha waaweyn ee uu xaqiijiyey Kacaanka Oktoobar iyo hirgelinta mabaadi'da caddaaladda, sinnaanta iyo midnimada iyo biseylka garaadka siyaasiga ah ay Ummadda Soomaaliyeed gaartay;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay Ummadda Soomaaliyeed hadda diyaar u tahay inay si toos ah uga qayb qaadato siyaasadda iyo Maamulka Guud ee Dalka, sidaas darteedna loo baahan yahay in la abuuro Xisbi Hantiwadaag ah oo salka ku haya mabaadi'da iyo himilooyinka Kacaanka Oktoobar;

ISAGOO FULINAAYA: Mabaadi'dii iyo ujeeddooyinkii lagu caddeeyay Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka fadhigiisii 8da Juunyo 1976;

WUXUU GUDDOOMIYEY

1. Marka laga billaabo 1da Luulyo 1976 waxaa la dhisay Xisbi Siyaasi ah ee waddani ah laguna magacaabo Xisbiga HANTIWADAAGGA EE KACAANKA SOOMAALIYEED.

2. Xisbigu wuxuu lahaan doonaa astaan iyo jiritaan sharci ah.

3. Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed waa midka qura ee ka jiri kara Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, lamana abuuri karo Xisbi kale ama urur siyaasi ah oo aan ahayn midka ku xusan Qodobka 1aad ee Guddoonkan.

4. Xisbiga Xaruntiisu waxay noqoneysaa Xamar, wuxuuna ku yeelan karaa laamo iyo xubno Gobollada, Degmooyinka, Tuu-

looyinka, Wasaaradaha, Wakaaladaha, Warshadaha, Xarumaha Ciidammada Qalabka Sida iyo hadba meeshii kale ee looga baahdo.

5. Calaamadda Xisbiga waa BURRUS iyo YAAMBO isdhaafsan oo XIDDIGTA Calanka Soomaaliyeed kor ka saaran tahay iyo labo CALEEMOOD oo ku wareegsan.

6. Xisbigu wuxuu sii wadayaa Mabaadi'dii iyo Siyaasaddii Kacaanka ee ku caddeyd Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka Oktoobar, ujeeddadiisuna waa hirgelinta Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan ee ku cad Xaashida Labaad ee Kacaanka.

7. Xisbigu wuxuu yeelan doonaa destuur u gaar ah iyo xeer hoose oo saameeya qaabka iyo habka maamulka Xisbiga.

8. Marka laga billaabo Kowda Luulyo 1976, Golaha Sare ee Kacaanku, xukunkii iyo awooddii maamulka Dalka ee uu kula wareegay Sharciga lambarkiisu yahay 1 (kow) ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969, wuxuu ku wareejiyay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed - Golaheeda Siyaasiga ah.

9. Muddo shan sano gudaheeda, haddii aanay imaanin dhibaato laga fursan waayay, waa in la soo saaro Dastuurkii lagu maamulayay Dalka.

10. Muddada ku meel gaarka ah, ka hor intaan la soo saarin Dastuurka Dalka, awoodda sharci dejinta Dalka waxay Guddiga Dhexe ee Xisbigu u xilsaari doontaa Guddi gaar ah oo uu Guddoomiye ka yahay Xoghayaha Guud ee Xisbiga ama cid ka Wakiil ah.

11. Xubnaha Guddiga kor ku xusan iyo habka uu ku shaqayn doono waxaa lagu soo saari doonaa xeer u gaar ah.

12. Guddoonkaani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Muqdisho, 1 Luulyo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

*(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

## GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Sharcigii 1aad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Horukaca ay Ummadda Soomaaliyeed gaartay dhinaca Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Bulshada intii uu jiray Kacaanka Oktoobar;

ISAGOO TIXGELIYEY: Guulaha waaweyn ee uu xaqiiijyey Kacaanka Oktoobar iyo hirgelinta mabaadi'da caddaaladda, sinnaanta, midnimada iyo biseylka garaadka siyaasiga hantiwadaagga ah ee ay Ummadda Soomaaliyeed gaartay;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay Ummadda Soomaaliyeed diyaar u tahay inay si toos ah u maamusho siyaasadda iyo hoggaaminta Dalka, sidaas darteedna loo baahan yahay in la abuuro Xisbi Hantiwadaag ah oo salka ku haya mabaadi'da iyo himilooyinka Kacaanka Oktoobar;

ISAGOO FULINAAYA: Mabaadi'dii iyo ujeeddooyinkii lagu caddeeyay Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka fadhigiisii 8da Juunyo 1976;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

1. Marka laga billaabo 1da Luulyo 1976 waxaa la dhisay Xisbi Siyaasi ah ee waddani ah laguna magacaabo XISBIGA HANTIWADAAGGA EE KACAANKA SOOMAALIYEED.
2. Xisbigu wuxuu lahaan doonaa astaan iyo jiritaan sharci ah.

### Qodobka 2aad

Xisbiga Haniwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed waa midka qura ee ka jiri kara Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, lamana abuuri karo Xisbi kale ama urur siyaasi ah oo aan ahayn midka ku xusan Qodobka 1aad ee sharcigaan.

### Qodobka 3aad

Xisbiga xaruntiisu waxay noqoneysaa Xamar, wuxuuna ku yeelan karaa laamo iyo xubno Gobollada, Degmooyinka, Tuulooyinka, Wasaa-

radaha, Wakaaladaha, Xarumaha Ciidammada Qalabka Sida iyo hadba meeshii kale ee looga baahdo.

Qodobka 4aad

Calaamadda Xisbiga waa BURRUS iyo YAAMBO isdhaafsan oo XIDDIGTA Calanka Soomaaliyeed kor ka saaran tahay iyo labo CA-LEEMOOD oo ku wareegsan.

Qodobka 5aad

Xisbigu wuxuu sii wadayaa Mabaadi'dii iyo Siyaasaddii Kacaanka ee ku caddeyd Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka Oktoobar, ujeeddadiisuna waa hirgelinta Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan ee ku cad Xaashidii Labaad ee Kacaanka.

Qodobka 6aad

Xisbigu 'wuxuu yeelan doonaa destuur u gaar ah iyo xeer hoose oo sameeya qaabka iyo habka maamulka Xisbiga.

Qodobka 7aad

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa isla markiiba waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.
Muqdisho, 1 Luulyo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

*(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Sharcigii 1aad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 17 ee lagu dhisay Xisbiga Hantiwadaagga ah ee Kacaanka Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIYAY: In marka laga billaabo Kowda Luulyo 1976 Golaha Sare ee Kacaanka uu ku wareejinayo Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed xukunkii iyo awooddii maamulka Dalka, sida ku cad Xaashida Saddexaad ee Kacaanka, qodobkeeda 8aad.

ISAGOO TIXGELIYAY: Marxaladdan kala guurka ah ee ay maraysο Ummadda Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka fadhigiisii 8da Juunyo 1976.

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Inta doorasho shacbi weynuhu ka wada qayb galo laga gaarayo habka lagu hoggaaminayo Dalka wuxuu noqonayaa kan loo yaqaan Hab Madaxtooyo (Presidential System).

### Qodobka 2aad

1. Ayadoo la tixgelinaayo waqtigaan kala guurka ah, waxaa Golaha Sare ee Kacaanku guddoonshay in jagada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya iyo Xoghayaha Guud ee Xisbigu ay mideysnaadaan.
2. Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya ee kor ku xusan waxaa sameyn doonaa Shirweynaha aasaaska Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed oo shaqadiisii bilaabmay 27ka bisha Juunyo 1976.

### Qodobka 3aad

Qofkii loo doorto jagada Madaxweynenimada ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya wuxuu yeelanayaa awooddii uu lahaa Ma-

daxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku, aas/aaska Xisbiga Hantiwadaagga ka hor.

Qodobka 4aad

Shareeigani wuxuu dhaqan gelayaa isla markiiba waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Muqdisho, 1 Luulyo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

*(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

SHARCI Lamb. 19 ee 1 Luulyo 1976.

Ku wareejinta Xilkii G.S.K. Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed.

## GUDDOONSHAHA

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Sharcigii 1aad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 17, taariikh 1 luulyo 1976 ee lagu dhisay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed.

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in Golaha Sare ee Kacaanku uu ku wareejiyo Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaalieed, xukunkii iyo maamulka Dalka oo uu la wareegay Golaha Sare ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO FULINAAYA: Mabaadi'dii iyo ujeeddooyinkii lagu caddeeyay Xaashida Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka;

MARKUU AQOONSADAY: In Ummadda Soomaaliyeed ay gaadhay biseyl siyaasiya, diyaarna u tahay inay si toos ah uga qayb qaadato siyaasadda iyo maamulka Dalka;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka fadhigiisii ahaa 8da Juunyo 1976;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Marka laga billaabo 1da Luulyo 1976, Golaha Sare ee Kacaanku, xukunkii iyo awooddii maamulka Dalka ee uu kula wareegay Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969, wuxuu ku wareejiyay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed ee lagu dhisay Sharciga lambarkiisu yahay 17 ee 1da Luulyo 1976.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 1 Luulyo 1976, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Muqdisho, 1 Luulyo 1976.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

*Madaxweynaha G. S. K.*